Maxaa ku jira warbixinta ku-meel gaarka ah?

Royal Commission-ka Nadaamka Caafimaadka Dhimirka ee Fiktooriya ayaa la asaasay sababtoo ah waxaa jirtay aragti caam ah oo ah in adeegyada caafimaadka dhimirku gaaray meeshii ugu xumayd. Dad badan oo la nool jirada dhimirka ayaan hellayn daaweyn, daryeel iyo kaalmo marka iyo meesha ay ku siin kari lahayd faa'iidada ugu badan.

Guddiga ku meel gaarka ahi warbixintooda waxaa ku jirta talooyin mudnaan leh kuwaas oo wax ka qabanaya baahida degdegta ah waxayna salka u dhigaysaa qaab cusub oo caafimaad. Tani waa talaabadii ugu horraysay uguna muhiimsanayd.

Guddiga talasoojeedintiisa waxaa ku jirta warbixintii ugu dambaysay, waxayna soo baxaysaa Oktoobar 2020, wuxuuna soo gudbin doonaa hab ballaran oo mira-dhal ah si wax looga bedelo nadaamka caafimaadka dhimirka.

Maxaa warbixintaan ku meelgaarka ahi ku talinaysaa?

- Hab cusub oo maalgelinta caafimaadka dhimirka (tax ama levy), si loo xaqiijiyo siyaadin wax ku oolla xagga kharash ku bixinta caafimaadka dhimirka - maaha keliya hadda laakiin mustaqbilka.
- Abuurista Xarunta isku-xirnaanta reer Fiktooriya ee Caafimaaka Dhimirka iyo Samaqabka si la isugu keeno xirfadaha kala duwan iyo aqoonyahanada si loogu hello dhamaan dadka reer Fiktooriya natiijooyin wanaagsan oo caafimaadka dhimirka.
- 170 dhalinyaro iyo dadwaaweyn ah oo qaba dhib weyn oo dhimirka ah si loo caawimo waxna looga qabto cadaadiskaan meelaha baahidu ka jirto.
- Ballaarinta barnaamijka Hospital Outreach Post-suicidal Engagement (HOPE) ee dhamaan goobaha adeegyada caafimaadka dhimirka lagu xiriiriyey qayba-hoosaadka adeegyada caafimaadka iyo weliba da'daalada cusub iyo daba galka adeega daryeelka carruurta iyo dhalinyarada, si loo siyaadiyo helitaanka kaalmada iyo gaarsiinta dadka reer Fiktooriya ee khatarta ugu jira isdilka.
- Abuurista Xarunta Bulshada Aborijin-ka iyo Xarunta Samaqabka Shucuurta, iyo ballaarinta kooxaha samaqabka shucuurta iyo bulshada Aborigin-ka ee Australia oo dhan.
- Asaasida adeega caafimaadka dhimirka guryaha degaanka ee ugu horreeyey Fiktooriya, kaas oo bedelaya xalka jiifinta caalwaaga ah, looguna talagalay lana siinayo dadka la nool waaya-aragnimada jirada dhimirka.
- Ballaarinta iyo kaalmaynta macmiilaha iyo daryeellaha-qoyska la nool waaya-aragnimada shaqaalaha.
- Wax ka qabashada shaqaale la'aanta iyo diyaarinta dib u habayn ay ku jirto bixinta tababara badan iyo shaqaalaynta si loo xoojiyo kalkaaliyayaal caafimaad oo ah heer jaamacadeed mihnadlayaasha caafimaad ee isku-xiran oo adeega caafimaadka dhimirka dadweynaha.
- Isku dubaridida xafiiska Hirgelinta Caafimaadka Dhimirka si loo bilaabo shaqooyinkaan ka miradhalinta talooyinkan.

Kani ma warbixintii ugu dambaysay baa?

Maya, warbixin ka dambaysay ayaa la bixin doonaa Oktoobar 2020.

Yaa fulinaya talooyinkaan?

Xukuumada Fiktooriya waxaa ka go'an hirgelinta dhamaan talooyinka uu sameeyeey Royal Commission-ku.

Guddigu wuxuu soo jeediyey in Xafiiska Caafimaadka Dhimirku la asaaso si loo bilaabo bixinta talooyinka.

Maxaa dhacaya haddii aan qabo su'aal ku saabsan warbixin ku meel gaara?

Haddii aad qabto su'aallo aan lagaga jawaabin halkan, waxaad la xiriri kartaa Guddiga adigoo u maraya **contact@rcvmhs.vic.gov.au**, 1800 00 11 34, ama PO Box 12079, A'Beckett Street, Victoria 8006.

Haddii aad u baahan tahay mutarjum, fadlan wac 03 7005 3010.

Ma helli kartaa qoraalka warbixinta ku meel gaarka ah?

Royal Commission-ka waxaa ka go'an hoos u dhigida raadkeeda bay'ada. Sidaas oo ay tahay, Guddigu waxay ku dhiirgelinayaa dadka inay akhriyaan warbixinta ku meelgaarka ah iyo dukuminti kooban oo websayt-kayaga ku jira.

Haddii aadan geli karin internetka waxaad isku deyi kartaa maktabada agtaada ah.

Warbixinta ku meelgaarka ah ma tahay hab la helli karo?

Waxaa jiri doona mid la helli karo oo ku qoran habka Word version dukumintiga ku meelgaarka ah waxaana laga helli doonaa websaytka Guddiga dhowaan.

Haddii aad jeclaan lahayd in lagula socodsiiyo marka kuwaas la helli karo, ama haddii aad jeclaan lahayd inaad ka hadasho sidaad ku helli lahayd gelida loo baahan yahay, waxaad la xiriiri kartaa Guddiga adoo u maraya **contact@rcvmhs.vic.gov.au** ama 1800 00 11 34.

Maxaa wax walba wax loogaga qaban waayey warbixinta ku meelgaarka ah?

Weli ma aanu gaarin bartamaha teeramka Royal Commission-kaan. Warbixinta ku melgaarka ahi waa bilaw. Waxaa weli noo taal shaqa badan.

Guddigu waxay dhegaysteen dad aad u kala duwan kuwaas oo dhamaantood raba inay door ka cayaaraan ka dhigida nadaamka mid qof walba u wanaagsan - dadka la nool khibrada jirada dhimirka, daryeellayaasha iyo qoyska, shaqaalaha, aqoonyahanada, iyo caafimaadka dhimirka iyo ururada kale.

Mid kasta oo ka mid ah 3,200 oo qoraal ah oo loo soo gudbiyey Guddiga waxaa akhriyey Guddoomiyaha guddiga ama shaqaalaha Guddiga.

Doorkaas la qaadanayaa waa sii soconayaa si ay noogu sheegaan shaqooyinka na sugaya ee warbixinta ugu dambaysa Oktoobar 2020.

Ma jiraa hanaan wada tashi oo ku saabsan warbixinta ku meel gaarka ah?

Uma yeerayno soo gudbin rasmi ah oo la xiriirita warbixinta ku meel gaarka ah - kani waa waxaan ilaa hadda ka maqalay kaas oo wax ka qabanaya baahiyaha degdegta ah oo asaaska u dhigaya wax ka bedelida mustaqbilka.

Guddigu wuxuu sii wadi doonaa wada-xiriirkiisa isaga oo maraya janalada caadiga ah - PO Box 12079, A'Beckett Street, Victoria 8006 or **contact@rcvmhs.vic.gov.au**.

sidee ku sii wadi karaa in aan lug ku yeesho?

Guddigu waxay helleen tabarucyo badan oo ka yimid bulshada ama jaalliyada ilaa hadda, kuwaas oo uu ku jiro wadatashi, qoraallo iyo dhegaysiga dadweynaha. Tabarucaasi waa sii socon doonaa si uu ugu sheego Guddiga shaqo socota.

Guddigu ma codsanayo soo gudbin/qoraallo intaas ka badan. Wuxuu ka imanayaa urur macluumaad wuxuuna isugu imanayaa taxliilin faahfaahsan iyo hindise nadaam.

Guddigu waa sii wadi doonaa inuu lug ku yeesho dad la nool waaya-aragnimo jirada dhimirka iyo diyaarinta warbixinta ugu dambaysa.

Guddigu wuxuu qaban doonaa dhegaysi dadweyne oo badan Abriil/May 2020.

Macluumaad intaas ka badan oo ku saabsan hawlgelin joogto ah, oo ay ku jirto dhegaysi dadweyne, waxaa lagu daabici doonaa websaytka Guddiga bilaha soo socda.

Waxaad iska diiwaangelin kartaa **bogga** cidda lala xiriirayo.